

XUQUUQDA ILMAHA EE DEEGAAN KORINEED OO AMMAAN AH

Lapsen oikeus turvalliseen kasvuympäristöön (somali)



Deegaan korineed oo ammaan ah – xuquuqda ilmaha iyo mas’uuliyadda qofka weyn

Ilmo kasta xuquuqdiisu waa inuu ku koraa deegaan ammaan ah. Mas’uuliyadda barbaarinta iyo wanaagga ilmaha waxaa iska leh waalidiinta. Waxay muhiim u tahay ilmaha inuu ahaado si dhab ah ilmo — inuu koro, ciyaaro oo barto xawligiisa isaga u gaarka ah oo aan qaadin mas’uuliyad xad-dhaaf ah.

Xuquuqda ilmaha ee muujinta dareenkiisa iyo fikirradiisa

- o Aqbal dareenka ilmaha oo si wadajir ah uga shaqeeya
- o Ka caawi ilmaha inuu ereyo u helo dareenkiisa
- o Samee jawi ammaan ah
- o Sii ilmaha meel uu ku muujiyo fikirradiisa gaarka ah
- o Tixgeli rabitaannada ilmaha



IN LAGA FIKIRO:
Carruurnimadaadii ma ammaan bay ahayd in laga hadlo dareenka? Ma suurtagal baa in dareenka sidoo kale lagu maareeyo ciyaarta?

La dhaqanka sinnaanta ku dhisan ee ilmaha

La dhaqanka sinnaanta ku dhisan ee ilmaha waa saldhigga deegaan korineed oo ammaan ah. Mabaadi'da soo socda waxay hagiis u yihiin waalidiinta.

- o Sii ilmaha fursad uu naftiisa ku muujiyo
- o Sii dhammaan carruurta fursado iyo waajibaad isku mid ah iyada oo aan loo eegayn jinsiga
- o Ka fiirso sida aad adigu u aragto sinnaanta u dhexeysa jinsiyada
- o Diiradda saar waxyaabaha wanaagsan oo ilaali hadalka dadka kale qadarinaya
- o Garo sida carruurnimadaada gaarka ahi uga muuqato habka aad u barbaariso ilmahaaga
- o Ka fikir noocyada fikradaha ama tusaalooyinka doorarka ah ee aad u gudbinayso ilmahaaga



IN LAGA FIKIRO:
Sidee ayay sinnaantu
uga muuqatay
carruurnimadaadii?
Shaqooyinka guriga ma
ku qaybsan yihiin
qoyskaaga iyadoo lagu
salaynayso jinsiga?



Deegaan korineed oo ammaan ah oo dhiirrigelin leh

Waalidiintu waa inay:

- o Abuuraan jawi ammaan ah oo aqbalid leh
- o Ilaaliyaan nolol-maalmeed la saadaalin karo
- o Dhiirrigeliyaan, ammaanaan oo qiimeeyaan ilmaha
- o Ka taageeraan ilmaha madax-bannaanida
- o U suurageliyaan ilmaha waayo-aragnimooyin guul
- o Ka fikiraan sida qiyamkooda iyo aragtiyahoodu u saameeyaan ilmaha
- o Si wadajir ah uga heshiiyaan hababka la xiriira barbaarinta
- o Noqdaan kuwo joogto ah, laakiin dabacsan



IN LAGA FIKIRO:
Qiyam nooc ee ah ayaad
rabtaa inaad u gudbiso
ilmahaaga?
Sidee ayaa lagu
dhiirrigeliyay adigoo
ilmo ah?



Nolol-maalmeed ammaan ah ayaa ilmaha ka ilaaliya stress xad-dhaaf ah

Dalabaad xad-dhaaf ah iyo culays badan waxay waxyeello u leeyihiin nolol-wanaagga ilmaha. Waxay adkayn karaan barashada wax cusub oo waxay isu muujin karaan dabeecad aan la rabin. Dabeecadda taban waxay isu muujin kartaa tusaale ahaan gardarro, go'doon ama isbeddello niyadeed.

Culays waxyeello leh wuxuu si gaar ah u dhashaa marka doorarka ilmaha iyo waalidka ay isku dhex yaacaan. Sidoo kale rabshad, dayacaad, isticmaalka maandooriyaha ee daryeelaha ama dhibaatooyinka dhaqaale ee qoyska waxay ilmaha ku keeni karaan stress xooggan oo muddo dheer soconaya, kaas oo daciifiya dareenka amniga ee ilmaha iyo koritaankiisa guud ahaan.

Hase ahaatee waa muhiim in la xasuusto in stress kasta uusan waxyeello lahayn. Stress muddo gaaban ah oo heer ku habboon leh wuxuu xitaa taageeri karaa koritaanka iyo waxbarashada ilmaha. Ka shaqaynta walwalka iyadoo lala joogo qof weyn oo ammaan ah waxay xoojisaa awoodda ilmaha ee la kulanka caqabadaha iyo ka gudbidda.



IN LAGA FIKIRO:
Ka fikir in carruurta
qoyskiinna ay leeyihiin
mas'uuliyad ku
habboon.
Sidee ayaa walwalka
loogu maareeyaa
qoyskiinna?

Sugidda nolol-wanaagga ilmaha marka loo guurayo waddan cusub

U guurista waddan cusub waa isbeddel weyn oo nololeed. Waa muhiim in fiiro gaar ah loo yeesho hubinta deegaan korineed oo ammaan ah oo ilmaha u sugan. Nolol-maalmeed la saadaalin karo, jadwal joogto ah oo la yaqaan iyo joogitaanka waalidka ayaa ka caawiya ilmaha deegaanka cusub.

Waa muhiim in ilmuhu sii hayo doorka ilmaha oo uusan ku qasbanaan inuu qaado mas'uuliyadda la qabsiga qoyska ee bulshada cusub. Ilmuhu ma aha inuu noqdo turjubaan, qof arrimaha maamula ama qof waalidka taageera — hawlahaani waxay u yaalliin qofka weyn.



Xasuuso sidoo kale inaad naftaada daryeesho. Wanaagga gaarka ah ee waalidka wuxuu si toos ah u saameeyaa waayo-aragnimada amniga ee ilmaha. Sidaas darteed waa muhiim in waalidku daryeelo adkaysigiisa gaarka ah oo uu ku dhiirrado inuu raadsado caawimo marka loo baahdo.



**Euroopan unionin
osarahoitama**

Mashruuca Niitty 2 2023–2026

*Wadajir loogu shaqaynayo nolol-maalin leh oo
wanaagsan ee qoysaska soo galootiga ah.*

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mashruuca:
projects.tuni.fi/niitty2

Albaabka macluumaadka qoysaska: tuni.fi/perheinfo

Warqaddan tilmaamuhu waxay ku salaysan tahay shaqo cilmiyeed: Salo, S. & Tuominen, A. (2026). Xuquuqda ilmaha ee inuu ahaado ilmo. Barnaamijka waxbarashada kalkaaliyeyaasha caafimaadka / TAMK.

Macluumaad dheeraad ah iyo lifaaqyada muhiimka ah:

Alasaari, N., Aromaa, E., Stenius, N. 2022. Tasa- arvoinen kasvatus- Opas vanhemmille ja muille lasten läheisille. Naisasialiitto Unioni ry.

Hakulinen, T., Onwen-Huma, H., Pulkkinen, P., Sandt, M., Varsa, H. 2022. Sukupuolten tasa- arvo neuvolan asiakastyössä. Sosiaali- ja terveysministeriö. Helsinki.

Mannerheimin lastensuojeluliitto. Lapsen kasvatus ja vanhemman kasvatustietoisuus. 2024.

Terveiden ja hyvinvoinnin laitos. 2024. Pakolaistaustaisten lasten ja nuorten mielenterveys. Thl.fi.

Unicef. Näin puhut lapselle lapsen oikeuksista. 2022.

Sawirrada: Canva



**Pirkanmaan
hyvinvointialue**



TAMPERE